

Ku socota Kiraystaha (*magaca*): \_\_\_\_\_

Ciwaanka Kiraystaha: \_\_\_\_\_

## Ogaysiiska Afar iyo Tobanka Maalin ee Bixinta Kirada ama Guriga Ka Guurista

Waxaad helayso ogaysiiskaan sababtoo ah mulkiilaha gurigaaga ayaa kugu eedaynaaya inaad ku dhaqmin shuruudaha heshiiskaaga kirada adoo ku fashilmay inaad bixiso kirada soo socota, adeegyada guriga iyo/ama kharashaadka soo laalaabta ama goos-gooska ah oo aad la daahday.

Meeqaa lagugu leeyahay? Bilahee lagugu leeyahay? (tig saar dhammaan meelaha ay qusayso)	Cadadka doolarka
<input type="checkbox"/> Kirada bilaha ah ee (liiska bilaha):	\$
<input type="checkbox"/> Lacagta adeegyada guriga (liiska bilaha):	\$
<input type="checkbox"/> Qarashaadka kale ee joogtada ah ama goos-gooska ah ee lagu qeexay heshiiska kirada _____ (liiska bilaha):	\$
<b>Wadarta Guud ee Cadadka</b>	<b>\$</b>
<b>Waa inaad bixisaa wadarta lacagta ama ka baxdaa guriga ugu dambayn (14 maalmood kadib marka ogeysiiskaan la helo): _____</b>	

### Waqtiga kama danbaysta ah!

Waa inaad dhiibtaa wadarta guud ee mulkiilaha gurigaagu kugu leeyahay muddo **afar iyo toban maalmood ah (14) maalmood** kadib marka lagu siiyo ogaysiiskaan, ama waa qasab inaad ka guurto guriga. Lacag kasta oo aad u dirto mulkiilaha guriga waa in marka hore lagu dabaqaa wadarta guud ee lagugu leeyahay ee ku cad ogaysiiskaan.

Ku fashilmida ku dhaqanka ogaysiiskaan muddo afar iyo toban (14) maalmood ah kadib marka lagu siiyo adeegaan ayaa keeni karta dacwad sharci oo keenaysa in lagaa saaro guriga.

### Sida lacagta loo dhiibo

Waxaad adeegsan kartaa qaab kasta oo lacag bixin oo lagu ogol yahay heshiiskaaga kirada. Ama waxaad adeegsan kartaa kaash, jeega qasnajiga, dalabka lacagta, ama sanduuqyada kale ee la ogol yahay.

### Caawimaada kirada iyo turjumaada

Office of the Attorney General (Xafiiska Qareenka Guud) ee Gobalka Washington ayaa ogaysiiskaan ku haya luuqado badan iyo sidoo kale xogta khayraadka la heli karo si lagaaga caawiyo bixinta kiradaada, ayna ku jiraan barnaamijyada caawimaada kirada ee gobalka iyo kuwa maxaliga ah, oo aad ka helayso webseedkooda oo ah [atg.wa.gov/landlord-tenant](http://atg.wa.gov/landlord-tenant).

Sharciga gobala ayaa ku siinaaya xaq aad ku hesho adeegyada turjumaanka oo aad ku helayso maxkamada.

Saxiixa Mulkiilaha/Dhulaha ▶ \_\_\_\_\_ Taariikhda: \_\_\_\_\_

**Meesha cadadka guud ee lacagta lagu bixinaayo:** Magaca Mulkiilaha Dhulka: \_\_\_\_\_

Ciwaanka: \_\_\_\_\_

### Caawimaada sharciga

Sharciga gobalka ayaa ku siinaaya matalaada sharciga maxkamada ayaana awoodi karta inay magacawdo qareen ku matala oo bilaash ah haddii aad tahay kirayste danyar ah oo u qalma.

Haddii aad aaminsan tahay inaad tahay kirayste danyar ah oo u qalma aadna doonayso in la magacaabo qareen ku matalaaya, fadlan la xariir:

- **Eviction Defense Screening Line (Laynka Baaritaanka Difaaca Kahortaga Guri ka saarida)** 855-657-8387
- Oonleen ku codso: [nwjustice.org/apply-online](http://nwjustice.org/apply-online)

### Macluumaad dheeri ah

- Wac 2-1-1
- Northwest Justice Project CLEAR Laynka Ka shaqeeya Banaanka King County: 888-201-1014, Maalmaha asbuuca 9:15 subaxnimo. – 12:15 duhurnimo, ama dadka waayeelka ah ee jira 60 iyo ka wayn: 888-387-7111
- Waxaad ka heli kartaa xog dheeraad ah oo ku caawinaysa barta [washingtonlawhelp.org](http://washingtonlawhelp.org)

### Xalinka khilaafka

Adeegyada dhexdhexaadinta ee bilaashka ah ama qiimaha jaban oo kaa caawinaaya khilaafaadka bixin la'aanta kirada kahor intaan dacwad sharci bilaaban ayaa sidoo kale laga heli karaa xarumaha xalinta khilaafaadka ee dhammaan gobalka.

Waxaad ka helayso xarunta kuugu dhow ee xalinta khilaafaadka barta [resolutionwa.org](http://resolutionwa.org).